Dhiigii ayaa iga joogsaday. Weli ma u baahnahay baaritaanka Pap smears?

Haa, khatarta kansar kaaga dhici kara ilma-galeenka afkiisa way siyaadaa markaad sii weynaataba. Haddii mar uun aad samaysay galmood, xataa hal qof, waa muhiim inaad Pap smears iska qaado labadii sanaba hal mar, xataa marka dhiigu kaa istaago.

Waxaan dareemay dhiig aan caadi ahayn (mid aan caadi ahayn)

Haddii aad isku aragto dhiig kasta oo aan caadi ahayn ama dheecaan ka soo baxaya siilka, arag dhakhtarkaaga sida ugu dhaqsa badan.

Ma xassuusto markii iigu dambaysay Pap smear

Dhakhtarkaaga ama rugta caafimaadka ayaa laga yaabaa inay leeyihiin nadaam laguugu sheego waqtiga ay tahay in lagaa baaro Pap smear. Dawlad goboleed iyo territory walbaa waxay leeyihiin meel lagu kaydiyo natiijooyinka Pap smear-ka. Xasuusin ayaa laguu soo dirayaa markaad dhaafto ballantii baaritaanka ama la-socod daaweyneed. Haddii aadan doonayn in macluumaadkaaga lagu kaydiyo diiwaanka ama aad hesho warqado xassuusin ah, u sheeg dhakhtarkaaga.

Xaggee ku samayn karaa Pap smear-kayga?

Waxaad ballan ka samaysan kartaa dhakhatarkaaga, kalkaaliyaha caafimaadka ama rugta qorshaynta qoyska agtaada ah. Waxaad weydiisan kartaa dhakhtar dumar ah ama kalkaaliso inay kaa qaado Pap smear. Haddii aad u baahan tahay mutarjum inuu joogo, u sheeg markaad ballanta samaysanayso. Saaxiib inaad keensatona way fiican tahay ama xubin qoyska ka mid ah.

Waxaan maqlay talaal cusub oo difaaca kansarka ilma-galeenka afkiisa

Haa, talaal ayaa la helli karaa kaas oo kaa difaaci kara infakshanka noocyada HPV oo keena kansarka ugu badan badan ee kansarka ilma-galeenka afkiisa. Talaalka waxaa loo ansixiyey dumarka Australia ee u dhexeeya da'da 9 ilaa 26.

Talaalka HPV waa lacag la'aan sida waafaqsan Barnaamijka Talaalka Qaranka.

Talaalku waa fiican yahay haddii la siiyo dadka dhalinta yar ka hor inta aanay u tegin nin. Talaalka waxaa loogu talagalay inuu ka hortago kansarka ilma-galeenka afkiisa ee jiilaalka soo socda ee dumarka ah. Haddii da'daadu tahay 12 ilaa 26 sano ama haddii aad leedahay gabar u dhexaysa 12 ilaa 26, la hadal dhakhtarkaaga wixii ku saabsan bilaabida talaalka.

Baaritaan joogto ah ayaa weli muhiima maadaama talaalka lagaga hortegi karo keliya qaar ka mid ah noocyada HPV ee kansarka ilma-galeenka afkiisa.

Baaritaan joogto ah oo Pap smears ayaa weli muhiima maadaama talaalka HPV aanu ka difaacayn dhamaan noocyada HPV kaas oo keeni kara kansarka ilma-galeenka afkiisa.

Macluumaad intaas ka badan oo HPV iyo talaal ayaa laga helli karaa websaytka Immunise Australia Program (Barnaamijka Talaal Australia) oo ah **www.immunise.health.gov.au**

Difaaca ugu fiicani oo lidka kansarka ilma-galeenka afkiisu waa in qofku sameeyo Pap smears joogto ah labadii sanaba hal mar.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Pap smear, ama haddii aad doonayso inaad cusboonaysiiso ama ka saarto faahfaahintaada diiwaankaaga Pap smear-ka gobolkaaga ama territorigaaga, wac **13 15 56** (qiimaha halka aad joogto).

Haddii aad dhibaato ku qabto ku hadlida Ingiriiska, wac khadka Adeega Afcelinta iyo Tarjumida qoraalka **13 14 50**. Lacagta lagaa rabaa waa qiimaha halkaad joogto.

Waxaad kaloo booqan kartaa websaytka:
www.cancerscreening.gov.au

SOMALI

Markii ugu dambeeyey oo Pap smear lagugu samayey goormay ahayd?

Kansarada badankood waa laga hortegi karaa haddii qof walba oo dumar ahi sameeyo Pap smear labadii sanaba hal mar.

National Cervical Screening Program
Da'daalka Dawlada Dhexe, Dawlad Goboleedka iyo Territoriska - wadajirka Australiyaanka

HA KA CUDUR DAARAN INAAD TAGTO, BALLAN SAMAYSO

Waa maxay Pap smear?

Pap smear waa baaritaan sahlan oo lagu eego ilma-galeenka afkiisa si lo xaqiijiyo inay caafimaad qabto. Wuxuuna ku yaalla ilma-galeenka afkiisa, waa siilka korkiisa (fiiri sawirka hoose).

Pap smear wuxuu qaataa daqiiqado yar xanuuna ma laha.

In Pap smear lagugu sameeyo labadii sanaba hal mar waa waxa ugu fiican si looga hortago kansarka gala ilma-galeenka afkiisa.



Maxaa loo samaynayaa Pap smear?

Baaritaanka Pap smear wuxuu muujiyaa digniinta ugu horaysa oo calaamadaha kansarka ilma-galeenka afkiisa. Marmarka qaarkood unugyada irida ilma-gelaanka ayaa isu bedela kuwa aan fiyoobayn (aan caadi ahayn). Baaritaanka Pap smear wuxuu helli karaa unugyo aan caadi ahayn ka hor inta aanu kansarku bilaaban?

Maxaa dhaliya kansarka ilmagaleenka afkiisa?

Infakshanka fayraska loogu yeero HPV (Human papillomavirus) ayaa ah waxa dhaliya dhamaan kansarada irida ilma galeenka. Waxaana jira in ka badan boqol nooc oo kala duwan oo ah HPV. Laba ka mid ah noocyadaan ayaa la ogyahay inay dhaliyaan kansarada badankood Australia.

HPV-gu waa wax guud. Dadka badankiis (afar meelood oo shan) ayaa waxaa dhici doona HPV mar ka mid ah noloshooda. Qof kasta oo galmood sameeya ayaa qaadi kara HPV.

Xaalladaha badankood, HPV isaga iska taga dhowr sano ka dib. Marmarka qaarkood fayrasku jirkaaga ayuu muddo iskaga jiraa, wuxuuna keeni karaa kansarka gala ilma-galeenka afkiisa. Kani badanaa wuxuu qaataa ilaa 10 sanadood.

Baaritaanka Pap smear ee labadii sanaba hal mar laga qaado ayaa helli kara isbedel kasta oo uu sababo HPV ka hor inta aanay isu bedelin kansar. Dhakhtarkaaga, kalkaaliyaha caafimaadka ama shaqaale caafimaad ayaa xaqiijin kara in caafimaadkaaga lala socdo aadna hesho daaweyn haddii aad u baahan tahay, si aad u fiyoobaato.

Yaa u baahan Pap smear?

Dhamaan dumarka da'da 18 ilaa 70 sano oo mar uun noloshooda galmood sameeyey ayaa waxaa waajiba inay sameeyaan baaritaanka Pap smear labadii sanaba hal mar. haddii xataa cida aad galmoodka wada samayseen uu yahay ninkaaga keliya, weli waa inaad samaysaa baaritaanka Pap smears.

Maxaa dhacaya haddii ilma galeenka la iga saaray (bixinta ilma galeenka)?

Weli waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay Pap smear iyada oo ku xiran nooca qaliinka ah oo lagugu sameeyey. La hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama shaqaalaha caafimaadka wixii kuu fiican.

Sidee Pap smear loo sameeyaa?



Sidaan ayaa wax u dhacayaan…

Marka ugu horeeya dhakhtarka ayaa ku weydiinaya inaad dharka ka qaado qaybta hoose aadna dhabarka u jiifsato si laguu baaro. Waxaad codsan kartaa dhakhtar dhadig. Markaas ka dib dhakhtarka ayaa adeegsan doona speculum (aallad dhakhtareeda) si uu u furo siilkaaga si ilmagaleenka afkiisa si fiican loogu arko.

Unugyada qaarkood ayaa si fiican waxaa loogu soo tiraa buraash yar ama spatula (qori yar oo afka ku wata cudbi). Unugyadaas ayaa waxaa la qaadaa waxaana loo diraa sheybaar waxaana lagu eegaa weynayso.

Sidee la dareemayaa?

Marmarka qaarkood in Pap smear lagaa qaado waa wax laga khajilo. Xasuuso, qofka samaynaya baaritaanka waa hawl maalmeedkooda kaman khajilayaan.

Habka wax loo samaynayaa waxaa laga yaabaa in aanu raaxo lahayn, laakiin maaha inuu dhib keenayo. Haddii xanuun yimaado la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama shaqaalaha caafimaadka isla markiiba.

Ka waran natiijada?

Marka baaritaanka Pap smear lagaa qaado waa muhiim inaad weydiso dhakhtarka sida iyo waqtigaad hellayso natiijada baaritaanka.

Natiijooyinka badankood waa caadi

Maxaa dhacaya haddii natiijooyinkaygu aanay caadi ahayn?

Haddii natiijadaadu aanay caadi ahayn maaha macnuhu inaad qabto kansar. Badanaa macnuhu waa waxaad qabtaa infakshan iskiis u bogsan doona.

Marmarka qaarkood dumarku waxay u baahan karaan Pap smear dhowr jeer. Qaar ka mid ah unugyada aan caadi ahayn ayaa laga yaabaa inay u baahan yihiin in dhakhtar khaas ahi daweeyo. Xaqiiji inaad la hadasho dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama shaqaale caafimaad wixii kuu fiican adiga.